Mataanihii Jacaylka



Qoraa: Xamse Tudhaale

Hordhac

Waa qiso dhab ah oo ka dhacday Magaalada Hargaysa, sababta aan u qorayna waa in lagu cibro qaato oo laga barto casharro badan oo ay xambaarsan tahay.

Hibayn

Waxa aan u hibeeyey Qisadan, dhamaan bulshoweyta Soomaalida; meel kasta oo ay joogaan.

Afeef

Ma khaldame waa Illaahay (S.W.T) hawl kasta oo aadmi u gacan qaadana kama madhna khaladaad, dhammastirkuna waa Sifaha Alle oo cidaan Alle ahayni waxba ma qabyo-tiri karto.

Dad badan oo iga aqoon badan igana caqli badan way akhrisan doonaan sheekadan waanay gaadhi doontaa, laga yaabaa in ay salluugaan ama ay u qushuucaan. Wixii khalad ah ee ku saabsan qoraalka ee si kama' ah iiga dhacay waxaan rajaynayaa in lagu aqbali doono laguna illaawi doono inta badan ee aan saxay dedaalna aan galiyay.

Sheekadu waxa ay soo baxday July, 2019

Waa isbarasho bilaabantay **4-tii bishii 12aad - 2016- 6:13** fiidnimo.
Udug iyo ciiltire waxa ay ku kulmeen faysbuugga oo ay in muddo ah iskugu jireen, balse hadda ka hor lama wada hadal.

.

Ciiltire ayaa uga mahadceliyay udug in ay aqbalaada ay ka aqbashay codsigii uu ka codsaday in uu kula saaxiibo bar kulanka.
Udugna soo dhawayn iyo sharfid ayaa ay ku ajiibtay. Sheekadii dhex martay intaas dhinacnaba umay dhaafin, qalo iyo kala gaabsi dhexdooda ka dhalatay awgeed iyo waliba Salaadii Makhrib oo ay u kaceen darteed. Muddo yar ka dib markii salaadda uu ka soo baxay, Ciiltire wuxuu toos u galay qaybta sawirrada oo uu kolba mid dul istaagayay; isaga oo aad uga boganaya la dhacsanna abuurteeda quruxda badan, muddo saacad ahna wuu dhex jibaaxayay bogga sawirradeeda!

Waxa ay maalmuhu is daba wareegaan, waqtiguna socodkiisa si bilaa kaadsiya u socdaalo; salaantana aan la isku dhaafin, waxa la soo gaadhay badhtankii bishii 6aad ee 2017-kii, walina damac iyo danayn ayaa ku soo kordhay qalbiga Ciiltire oo biyo dhigay kuwaas oo ku khasbay in goor fiid ah uu salaantii la dhaafo Udug lana gaadho xog waraysi shaqsi, waxa ay u sheegtay in ay tahay ardayad dugsiga sare dhigata fasalka 2aad, deggan tahayna isla Magaalada uu ku nool yahay Ciiltire. Isna waxa uu u sheegay xogtiisii shaqsiyeed oo ay ugu muhiimsanayd in uu yahay nin shaqaysta.

Sawirro la iswaydaarsaday ayaa ku noqday Ciiltire dab ku huriya oo qalbigiisa ku laba jibbaara xiisihii kolba ku laba kaclaynayay.
Isla habeenkiinna lakala qaaday ballan xidhiidh lagu samaynayo, si loo dhiso mustaqbal ku astaysan guur.
Nasiib darro se waxa bilaabmay kala mashquul iyo danayn la'aan ka imanaysay dhanka Ciiltire.
Waxa u sanqaday oo u khaakhaayiray iskuna sawiray oo walaac ku dhaliyay; shaki hor lehna abqaalay, qoraalo hore ugu xardhanaa gidaarka faysbuugga ee Udug oo uu dib u tixraacay, kuwaas oo ku saabsanaa ereyo kalgacayl iyo xidhiidh ka turjumaya oo ay qortay udug muddo hore!
Waxa uu gaadhay go’aan uu kaga noqonayo xidhiidhkeeda candhuuftiisana uu dib ugu liqayo, qalbigana uga saarayo xiisihii u hayay Udug, isaga oo ka gaabsaday salaanteedii iyo xidhiidhinteediiba!

Sannadkii **2017** waxa uu ku dhammaaday wada xidhiidh la'aan iyo gaabis ku imid xidhiidhkii bilaabmay ee Ciiltire iyo Udug.
Walaw ay udug yaaban tahay oo ay mar walba niyaddu ku dirqiyayso in ay xidhiidhiso sababtana waydiiso Ciiltire, dareenkii xishood ee dumarnimo ayaa ku dabrran, waxaanay doorbidday in ay iska aamusto oo ay bal isaga uun ka war sugto.
Isagii hawshiisa ayaa uu wataa oo shakigii uu kaga tanaasulay xidhiidhka ayaa uu ku adkaystay, walaw aanu waxba ka waydiin Udug ee uu isagu isku qanciyay in uu iska dhaafo; sidaasna ku illaawo xidhiidhkan isaga iyo Udug ka dhexeeya.

Maalmuhu way is gurayaan, saacadduna waxa ay wareejinaysa gacanta ay ku tirinayso tirooyinka jaan-goynaya Maalmaha, Bilaha iyo Sanaddada. Waa sannadkii 2018, Udug waa sideedii, walina waxa ay sugaysaa in ay ka war hesho Ciiltire, balse isaga wax badan ayaa iska beddelay, waxa uu ku tashaday in uu dhisto qoys oo uu helo lammaanihiisa.

Waa goor barqo oo ay saacaddu ku beegan tahay 10:30 barqonimo, waddadu waa cidhiidhi oo dad iyo gawaadhi ayaa isku garabsanaya dariiq yar oo aan ka badnayn 8 mitir. milicdu aad ayaa ay u kulushahay, maaddaama waqtigu xaggaa yahay bishuna ku beegan tahay Juun dabayaaqadeedii.
Waa Ciiltire oo gaadhi nooca loo yaqaan (Escudo) wata, shidhka horena ay ugu jirto gabadh xidhan niqaam iyo cabbaayad madaw, muraayadda hore ayaa si fiican looga dhex arkaaya waxa gudaha ku jira, walaw daaqadaha dhinacyadu dallacan yihiin beersool madawna lagu hagoogay oo aan gudaha mooyee dibada laga daalacan karin. Waxa uu ku jiraa kuyuuga gawaadhidu ku wada jirto, nin taraafiko ah oo caato ah dhexdana dirayskii ka xidhan; farxadda iyo firfircoonida uu shaqadiisa u hayaana wajigiisa ay ka muuqato ayaa kala hagaya gawaadhida, una gacan haadinaya isagoo siidhiga afuufaya kolba raxanta u leh in ay dhaqaajiyaan.
Ciiltire cadho ayaa uu kax (halkii u sarraysay) taagan yahay, waxa uu kolba isha ku xadayaa saacadda madaw ee ugu xidhan gacantiisa bidix.
Inta uu ku jeestay isagoo degganaan isku dayaya in uu muujiyo, ixtiraam uu u hayo hooyadii oo ahayd gabadha shidhka u saaran gaadhiga; ayaa uu ku yidhi
" Hooyo macaan waa iska sidaas waddadu markay jaam noqoto" waxa aanu sii raaciyay "50 mirir ayaynu haysanna si aynu u gaadhno gurigii ayeeyo oo aynu ballanta waqtigeedii uga soo baxno."
Hooyaddii oo arkaysa cadhada ka danbaysa dhoolla cadaynta wiilkeeda Ciiltire, ayaa ugu hal celisay " Wiilkaygii Ciiltiroow, waan arkaa cadhadaadee nafta deji waynu ka gaadhaynaa ballantee, waligaana samirka iyo deggenaanta kaasho wax kasta oo nolosha dhexdeeda aad kala kulanto."
" Hawraarsan hooyo" ayaa uu ugu warceliyay Ciiltire hooyadii, isaga oo aad mooddo in taladaasi qab ku tidhi maskaxdiisa oo uu wax ku qaatay.

Dhawaqii siidhiga iyo gacan haadintii wiilkii taraafikada ahaa; ayaa ku soo wajahmay jihada uu taagnaa gaadhiga Ciiltire, hore ayaanay ka dhaqaaqeen.

Muddo ay ballantii ka hadhsan tahay 20 daqiiqadood, ayaa ay gaadheen gurigii ay ku wajahnaayeen oo ahaa kii ayeeydii hooyo oo casuumad u fidisay.
Salaan iyo soo dhawayn diirran ka bacdi, waxa ay Ciiltire ayeeydii ku soo dhawaysay waji furan iyo mashxarad iyada oo si gaar ahna ula baxday ula kacdayna jihada uu ka xigo qolkeeda u khaaska ah. Gacantiisa bidix ayaa ku haysatay gacanteeda midig ilaa intii ay qolka galayeen.
Ciiltire ayaa isaga oo ka yaaban sababta goonida ay ula baxday ayeeydii ku yidhi "Ayeeyo maxaa soo kordhay ee jira waadigan dadkii igala soo dhex baxaye?"

Islaantii Cadar oo ah ayeeydii, ayaa iyada oo dhoolla cadaynaysa farxadna ka muuqato ugu hal celisay " Wiilkii inantaydu dhashayoow ii soo fadhiiso, war farxad leh baan kuu sidaaye" iyada oo farta ugu fiiqaysa kursi cad oo albaabka hoostiisa yaalla!
Kursigii soo jiiday, isaga oo degdegaya, ayeeydiina salka dhigtay sariirteedii hurdada, balse intii aanu hadal bilaabmin; ayaa waxa cod dheer ku soo dhacay tilifoon gacmeedkiisa, jeebadda ayaanu degdeg uga soo dhuftay, mise waaba Udug!

"Ciiltire duhur wanaagsan walaal; waxa aan kuu rajaynayaa in aad adiga lyo xaafadduba wacan tihiin. Aad baynu u kala raagnay oo muddo badan ayaan kaa aamusnaa oo aanan ku soo xidhiidhin adiguna sidoo kale, balse waxa aan rabaa in aynu galabta 5:00 is aragno si aan kuugu sheego arrin aad muhiim u ah ee may haleelaysaa?" Ayaa ay ku tidhi cod aad u deggan oo xishoodkii dumarnimana ka muuqdo.
Ciiltire oo aad u naxsan wadnuhuna gariirayo, kalmadahan sida dhibicda roobka qalbigiisa ugu dhibcaya ee ka soo baxay dibnaha Udugna xasuusiyeen maalmo qurux badnaa oo ay soo wada qaateen dhan kalena uu kaga furan yahay fikir uu ka fikirayo waxa ayeeydii kala hadli doonto ayaa degdeg ugu jawaabay " Waayahay walaal, waa si wanaagsan ee aan kula soo hadlo goor dhaw."
"Haye waan ku sugayaa" ayaa ay ugu hal celisay sidaasna way isku macasalaameeyeen.

Inta uu moobilkii degdeg u xareeyey ayaa isaga oo dhoolla caddaynaya ayeeydii ku yidhi "Haye ayeeyo bal warka isii, maxaa soo kordhay."
Islaantii Cadar oo farxad la muusoonaysa ayaa tidhi " Ayeeyo inankaygiiyoow waxa aan kuu wadaa war aad muhiim u ah oo noqonaya in aad guursato gabadh aan kuu soo xulay oo qurux iyo Diinba leh, ehelkeeduna yihiin kuwo dun wanaagsan oo dadnimo leh. Gabadhaasina waa gabadha aan maanta iskiin bari doono ee aan casuumadda aan idiin wada sameeyey. Waan dareemayaa in ay fajiciso kugu noqotay sheekadaydani balse waa wanaag aan kula jeclaaday iyo gabadh qiimo leh oo nolosha kula dagaal gali karta, meelna aad wada mari kartaan. Dookha adiga ayaa leh ayeeyo balse waan kula jeclaan lahaa ayeeyo ee bal adna weedhaada i dhe."
Talo ayaa ku ciirtay Ciiltire, madaxa ayaanu ka ruxay maaddaama u jecelyahay in uu doorto isagu qofka uu nolosha la wadaagayo. Balse haddana waxa uu naftiisa ku qanciyay in uu

ayeeydii dhagaysto oo la eego gabadha ay u soo jeedisay.
" Ayeeyo waa si wanaagsan ee i bar gabadha oo aan bal horta is baryano."

" Waa si wanaagsan ayeeyo ee aynu fadhiga tagno" ayaa ay ugu hal celisay.

Dhankii fadhiga ayaa la iskula kacay, ayeeyo Cadar ayaana ku soo dhawaysay qolkii fadhiga Ciiltire. Qacdii uu soo galayba, waxa uu isha ku dhuftay Axlaam oo ah gabadha ayeeydii u sheegayay ee ay rabto in ay barto.
Salaan ka dib waxa uu dhinac fadhiistay hooyadii oo laabta gashatay iyadoo aad u faraxsan. Qolka fadhiga waxa ku wada jira Isaga, Axlaam, Hooyadii Iyo ayeeydii oo Axlaam dhinaca ay isku hayaan.

Islaantii Cadar ahayd ayaa hadalkii bilowday oo tidhi " Inankaygii Ciiltiroow ayeeyo, gabadhan quruxda badan ee aad is hor fadhidaan waa Axlaam oo ah gabadh akhlaaq Iyo quruxba isku darsatay, sidaan hore kuugu sheegayna ehel sharaf leh ka soo jeedda oo hooyadeed ayaanu Asxaab ahayn oo aannu Jidda wada degganayn; isku sannadna ka soo wada guurnay ee barasho wanaagsan." Ayaa ay hadalkii kaga baxday iyada oo aad u riyaaqsan.

"..eeen...eeen..mahadsanid Ayeeyo, aad baan ugu faraxsanahay barashada Axlaam, waanan soo dhawaynayaa" ayaa uu isaga oo indhaha kolna cirka gaynaya, kolna dhulka gaynaya, marna ku xadaya ku yidhi Axlaam!

"Waaw! wiilkaygiiyoow ayeeydaa dookheeda waan ku raacsanahay, kuna qancay anigu." ayaa hadalkii ku boobsiisay Hooyadiina!

"..Aad baad u mahadsan tihiin dhammaantiin, aniguna sidoo kale waan ku faraxsanahay in aad iskaaya barteen Ciiltire; barasho wanaagsan walaalo" ayaa ay ugu hal celisay Axlaam wiilkii Ciiltire ahaa oo garaaca wadnihiisa ku qarinaya dhoolla caddayn; meelna aan jirin illeen waa nin shax loo sii degay oo haddii uu hasaawi lahaana waalidka intii mudanta ahayd dhexda ugu jiree!

Culaysyo badan oo maskaxeed ayaa kolba gundhinaya fikirkiisa iyo falanqayn uu gali lahaa, waxa dhan uu ka fikirayaa qoolkan uu galay, dhan kalena xusuustii soo rogaal celisay iyo ballantii Udug!

La wada qadee ee sheeko guud cabbaar laysku yar maaweeli.
Waxa saacaddu cagocagaynaysaa 3:00 galabnimo, Islaantii Iyo inanteedii oo ah Ciiltire hooyadii, qolkii uga huleele Wiilkii Iyo Gabadhii ;bal si ay iyaguna isku sheeko fahmaan, khajilaaduna uga baxdo. Kolay rag damac iyo dacar midna kama gudhee, laftigiisa gabadhan damac baa ka galay oo qurux aad soo jiidhasho u leh, ayaa Alle ku mannaystay Axlaam.
Xabaal iyo ninkeed loo kala tag bay noqotay oo wuxuu ku khasbanaaday in uu sheekada sii wado, si isbarashadu ugu yaraan u saldhigto.
Muddo 40 daqiiqo ah la kala xog qaaday oo ballan la wada qabsay, iyada oo ugu yaraan culaysyadii maskaxeed iyo kala qaloodkii meesha ka baxay; ayaa qolkii waxa ku soo

laabtay Ciiltire ayeeydii iyo hooyadii, si ay u hubiyaan in is afgarad la gaadhay.... muddo yar ka dib markii salaaddii casar la tukaday ayaa la wada casariyeeyey laysna macasalaameeyey, Ciiltire iyo hooyadiina gurigii ku soo laabteen.

Gurigii markii uu 10 daqiiqadood joogay, ayaa waxa soo wacday Udug oo u sheegtay in waqtigii ballanta la joogo, ayna khasab tahay in ay kulmaan; wax kasta oo ay ku qaadanaysana uu soo baxo oo uu ugu yimaaddo goob ay u sheegtay.
Dib ayaa uu gaadhigii u istaadhay uguna tagay Udug, walaw uu habsaamay waxa uu gaadhay Udug oo wajigeeda uu ka muuqdo daal iyo niyad jab badani, in kasta oo isaga laftigiisu culays badan dareemayo, haddana wajigiisa aad ugama muuqato.

Laba kursi oo yaallay barxadda goobtii kulanka ayaa ay fadhiisteen markii ay Isa salaameen ka dib.

" Udug aad baan kaaga raali galinayaa habsankayga" ayaa uu hadalkii ku bilaabay Ciiltire.

" Dhib malaha Ciiltiroow" ayaa ay ugu jawaabtay, iyada oo indhihiisa toos u eegaysa oo dhiirrani ka muuqato, wiilasheedana laga dheehan karayo waayaha ku suntan.
" Arrin aad u culus ayaa aan kuu wadaa ee fadlan dhagahaaga isii" ayaa ay u sii raacisay hadalkii.

"Haye walaalo, inoo bilow" ayaa uu ugu jawaabay; isaga oo Indho naxariis ka muuqato ku jalleecaya Udug.

" Waad ogayd Ciiltiroow isbarashadeennii Iyo sidii ay ku bilaabantay, walaw aynaan isa soo xidhiidhin in muddo ah labadeennuba waxa inoo kala danbeeyey waayo fara badan iyo maalmo hawshooda wata, anigu xaqiiqdii waan kugu qancay oo qalbigayga ruuxii ugu horreeyey ee si rasmiya u galay ayaa aad ahayd, walaw aynaan waqti inagu filan wada qaadanin. Adiga laftigaagana waxa aan kuu arkay in aad iska danaysatay oo aanad u jeedin xidhiidhkeena, cid kalena aad xidhiidh la waddo; xishood dumarnimo ayaa i xidhay oo kuumaan waayo sheegan karaynin, balse dusha ayaa aan kaala socday, in kasta oo aanan ogayn adiga laftigaagu xaallada aad ku sugan tahay oo dhan, haddana waxa aan kuu rajaynayaa in aad ku jirto nolol aad ku faraxsan tahay. Caawa waxa igu khasbay in aan kula kulmo oo aan kuu waayo sheegtaana; waa in ay tahay waqtigii iskugu keen danbaysay aragti ahaan iyo ismaqal ahaanba! Berri duhurka waxa aan u baxayaa Waddanka Maleeshiya oo aan deeq waxbarasho ka helay, halkaas ayaanan ka bilaabanayaa nolol cusub oo aan adiga kugu ilaawo, tan macnaheedu maaha inaan calool xumo kuu hayo, balse waa inaan ilaashado qalbigayga mustaqbalkaygana badbaadsado." Ayaa ay Udug hadalkeedii ku soo afmeertay, iyada oo illinta wiilasheeda ka soo burqanaysaana; ay toos ugu dhacayso miiska u dhexeeya iyada iyo Ciiltire!

Talo ayaa ku caddaatay Ciiltire, meel uu wax ka bilaabana wuu garan waayay, isaga oo ka anfariirsan kalmadahan ka soo baxaya afka udug iyo dareenka murugo ee ka muuqda wajigeeda ayaa uu ugu hal celiyay
"Udugeey walaalo aad ayaan uga xumahay dhibta aan ku soo gaadhsiiyay, balse may

ahayn mid aan kas u sameeyey in aan qalbigaaga dhaawaco; waan dhayalsaday xidhiidhkeenii oo waxa aan u qaatay in xiise kaliya uu kaa ahaa; aad baanan uga damqanayaa goor ay xeedho iyo fandhaal kala dhaceen; in aan ku soo beegmay oo aanan waxba joojin karaynin, balse kaliya ay tahay inaan aqbalo oo aan tixgaliyo go'aankaagaas; ducana kugu sagootiyo."
Jawigu markiiba waxa uu isku beddelay mid murugo hadhaysay, Ciiltirena waxa aad mooddaa in wedkiisii loo sheegay, in kasta oo uu qalbiga ku hayay Udug; muu galinin waqti iyo dedaal uu ku soo dhaweysto iyada hawadiisa ayaanu iska raacay; ilaa ay caawa ku noqotay waran wadanaha lagaga hujuumay!
Cabbaar ayaa midba dhankiisa iska tirayay ilmada iskuna dayayay in uu sidiisii ku soo noqdo.

Ciiltire ayaa hadalkii ku soo noqday oo yidhi
" Waxa kale oo aanan kuu sheegin in aan maanta soo bartay gabadh ay iskaaya bartay ayeeydeey; rabtana inaan guursado, markii hore niyad umaan hayn oo adiga ayaa aan kugu xisaabtamayay balse haddii aad iga hayaamayso anna waan sii wadan noloshayda adigana waan kuu soo ducaynayaa." ayaa uu isaga oo foorara murugana muujinaya hadalkiisii ku soo xidhay
" Haye walaal, wanaag oo dhan ayaan kuu rajaynayaa iyo mustaqbal qurux badan" ayaa ay hadalkii ku soo afmeertay Udugna, waana la is macasalaameeyey.

Gurigii ayaa uu markiiba ku soo noqday Ciiltire isaga oo aad u niyad jabsan, waxa aanu wacay Axlaam oo uu isku dayay in uu ku nafiso, sheeko kaftan u badan ayaa uu bilaabay ilaa ay gaadhay 3 saacadood oo xidhiidh ah, ugu danbayntiina guurbay ka wada hadleen, waanay ka aqbashay balse waqti is barasho in ay wada qaataan habeen danbena ay kulmaan ayaa ay ku ballameen.
Waxa ay gaadhay subaxnimadii, Ciiltirena waxa uu u kicitimay xafiiskiisii oo ahaa shirkad soo dajisa qalabka dhismaha oo uu maamul ka ahaa.
Gaadhigiisii ayaa uu ku soo dhacay isaga oo degdegsan, waddadii gaynaysay goobta shaqadana afka ayaa uu u soo saaray gaadhigii oo uu ku wado xawaare aad u sarreeya! maaddaama uu habsan yahay, hurdaduna la tagtay sheekadii uu xalay la yeeshay Axlaam awgeed.
Mar kaliya waxa uu isha ku dhuftay gaadhi weyn oo haadkiisa ku soo jira..!waxa uu u dhuftay gaadhigiisii mar kaliya haadkii kale; si uu ugu yaraan isku badbaadiyo!.....
Nasiib wanaag waa uu ka duway gaadhigii, balse gaadhi kale oo seeraf ah; ayaa uu afka ka galay oo haadka kale uu ku doontay!!
.... qaylo iyo qiiq ayaa is qabsaday, dadkii meesha joogayna waxa ay gargaar u fidiyeen labadii gaadhi ee isku dhacay, in kasta oo aanay jirin wax dhimasho ahi, dhaawac ayaa soo gaadhay Ciiltire iyo 5 qof oo kale oo gaadhiga seerafta ah saarnaa!
Dhakhtarka ayaa loola orday markiiba, koomo 3 saacadood ah ayaanu galay Ciiltire oo uu lugaha Iyo feedhaha ka soo gaadhay jabniin, 4-tii qof ee kale oo iskugu jiray Islaan Iyo

gabadh ay dhashay ayaa jabniin ka soo gaadhay lugaha Iyo gacmaha balse waxa u dheer in gabadhu ay gashay koomo ilaa walina ay ku jirto!
Labada qof ee kale oo ah Oday Iyo wiil yarna dhaawac fudud soo gaadhay!

eheladii labada dhinac ayaa markiiba soo buuxiyay labada qol ee ay ka kala yaalaan; dhismaha gargaarka deg-dega ah Ciiltire iyo gabadhii kale ee koomada ku jirtay.

Koomadii way ka soo baxeen; muddo saacad ah ayaana laga joogaa. Labadii qoysna mid walba waxa uu ku mashquulay dhayitaanka dhaawacooda oo hadal la is dhaafsaday oo aan ahayn in xaaladda la is waydiiyo ma jiro. Laba qol oo isku xigana waa loo raray; Ciiltire, gabadhii iyo hooyadeed .
Waxa ugu baryay maalinkii 3aad oo xidhiidh ah, odayaashii ayaana galay xallinta arrimihii magta iyo kharashaadkii burburka gawaadhida lagu hagaajin lahaa, Walaw uu khaladka lahaa Ciiltire, haddana Qadar dhacay lama baajin karee wada fadhi ayaa lagu xalliyey; dhammaan hawlihii shilka oo odayaashii labada dhinac ka socday ayaan si miyir leh u dhammeeyey. Qayb ka mid ah Magtii dhaawacyada inanta reerkoodu, way ka saamaxeen. Ciiltire si fiican ayaa uu u soo kabanayaa, in kasta oo aanu ka hinqan karin sariirta, haddana wuu dhaamaa sidii uu ahaa, gabadha laftigeeda iyo hooyadeedna waa la mid. Inanta habar yarteed oo degganayd Magaalada balse goor danbe loo sheegay; ayaa soo gashay qolkii Ciiltire ku jiray, waxa ay bilowday aflagaado iyo cay aan joogsi lahayn, Hooyada dhashay isaga oo kaliya ayaa la joogtay oo muddo markii ay isku dayday in xaaladda dejiso ku guul darraysatay oo iyaduna xanaaqday, halkii ayaa uu dagaal ka dhacay oo gacanta ay iskula tageen Islaantii inanta habaryarta u ahayd iyo Ciiltire Hooyadii. La soo kala gaadh buuqii markii la maqlay oo qaar ka mid ah shaqaalaha ayaa kala qabtay in muddo ah markii ay madaxa iskula jireen. Nasiib darro se lugta bidix ayaa ay ka jabtay Ciiltire hooyadii!... fawdo kale ayaa ka bilaaban tay dhakhtarkii dhexdiisa oo iyaguna hablihii ay walaalaha ahaayeen Ciiltire ayaa soo dagaal tagay!... qoladii dhakhtarkuna waxa ay amar ku bixiyeen in 3-da qof ee dhaawaca ah iyo ehelkoodaba laga saaro dhakhtarka, laba meelood oo kala geddisanna la geeyo.
Laba dhakhtar oo aad u kala fog ayaa loo kala raray dhaawacyadii. Odayaashii ayaana dib u galay hawshii oo dib u heshiisiin bilaabay. Khasaare kale ayaa isna soo kordhay! Ciiltire iyo Hooyadiina isku qol ayaa la dhigay oo dhaawacyadooda lagu dabiibayaa. Axlaam iyo hooyadeed ayaa soo bookhday oo ugu yimid dhakhtarka Ciiltire iyo Hooyadii, xaal waraysi kooban ka dibna ka soo laabtay. Dhaawacyada uu la tacaalayo marka laga yimaaddo waxa kale oo wali maskaxdiisa ka guuxaysa oo isku ciil kaambinayaa " Nasiib xumadaada ma adiga oo aan arag ama ka warhelin Udug ayaa ay iska tagtay " waxa uu wacay moobilkeedii isaga oo nafta ku samirsiinaya!
Ma dhacayo oo wuu xidhan yahay; meel iyo cid uu ugu hagaagana garan maayo! Maalmuhu way is gurayaan, isna nasiib wanaag wuu soo kabanayaa oo dhakhtarka dhexdiisa ayaa uu socodkii ku tijaabiyaa; isaga oo adeegdanaya bir caawisa. Hooyadiina si fiican ayaa ay u kabantay oo bil wax aan ka badnayn bay ku bogsatay!

Waxa laga joogaa muddo 9 bilood ah dhaawicii soo gaadhay Ciiltire, shaqadiisiina toos ayaa uu u wataa oo xaalkiisu aad ayaa uu u wanaagsan yahay. Wax badan ayaa isbeddelay oo dhakhtarku Ciiltire waxa uu u sheegay in dhaawicii soo gaadhay ku sababay madhalaysnimo rejada laga qabo in uu ubad helaana aanay macquul ahayn.
Axlaam markii ay maqashay arrinkaas, kumay soo dhawaan ee way ka huleeshay! Saaxiibkii Maxamed ayaa ugu yimid galabnimo, meel lagu wada caweeyo. Waxa aanu u sheegay in gabadhii barigii ay shilka wada galeen ee dhaawacan tay ahayd Udugsan oo subaxaas; u sii baxaysay gegida diyaaradaha si ay ugu dhoofto! Balse la qaaday oo la geeyey Hindiya; muddo 5 bilood ku dhaw, markii dhaawaceeda waxba Dalka lagaga qaban waayay.
Naxdin bay ku noqotay Ciiltire in dhacdadaasi ahayd mid aanu ku baraarugin nasiibna u helin in uu helo xogtaas, waqtigii xaalku taagnaa!

Axlaam wiil inaadeerkeed ah ayay is guursadeen; nolosheediina hore ayaa ay u sii wadatay. Cidlada iyo murugada; waxa kaga daran Ciiltire mustaqbalkiisa guur ee mugdigu galay.

Reerkoodii aad bay uga niyad jabsan yihiin in lagu sheegay madhalaysnimo Ciiltire! Balse waxa ay rejo ka qabaan in maalin uun uu heli doono gabadh ku raacda sidaas.
Udug waxa ay muddo Iska joogtay Hindiya, iyada laftigeeduna maba dhaddana kumanay fikirin Ciiltire in uu ahaa wiilkii ay shilka wada galeen ee dhabta ay wada muteen. Walaw ay baaqatay; waxbarashadii dalkana ku soo noqonayso, waxa ay rejo ka qabta in ay mar kale la kulanto Ciiltire ugana warranto qaddarka ku dhacay..
Habeenimadii markii uu cawayskii soo dhammaystay Ciiltire ee uu dariiqa ku soo jiray, si uu gurigooda ugu carraabo; ayaa waxa uu mar kaliya ku tuurtay, heesta uu ku luuqeeyo Suldaan Seeraar ee magaceeduna yahay (Mataantii Jacaylka)
Isaga oo ku xusaya, waayitaanka uu waayay Udugsan iyo waayaha kala fogeeyey labadooda. Waana kuwan ereyada qalbigiisa ruxayay ee ku jiray heesta:

Dunidaa madawgiyo
Mugdigaba la dhalatoo
Ma dhamaysto aadmigu

Intuu midho abuurtee
Mixnad layna galiyiyo
Mushkiladihii aduunkaa

Ina kala muquunshoo

Midba gabi ku moosee
Muraadkeedaa noloshaa
Murug lagu lifaaqoo
Sidii loo macneeyaba
Naftu mahadin maysoo

Intaan kala maqnaanshaha
Uu midkeenba meel jiro
Warkeenuna is moog yahay
Ma ogiba si aan ahay
Mataantii jacaylkaay
Maxaad mudatay dabaday
Ma nooshahay ma dhimashaa
Xaggeed maanta joogtaa
****

Qoyska maamulkiisaa
Ku macaan la maalaa
Wada maala caashaqa
Mudnaantana haleelee
Anna muxibadaadii
Maalin igama suushoo
Waxaan maanka ku hayaa
Mar inaynu kulanee
Mid ahaan indhahaaga
Macaan hadday bukooto
Muuqa iyo aragtida
Meel fog kama arkyside
Wadnayaal midooboo
Midigta is qabsaday
Ma iyagaa masaafiyo
Meel ku kala maqnaan karaa
Mataantii jacaylkaay
Maxaad mudatay dabaday
Ma nooshahay ma dhimashaa
Xaggeed maanta joogtaa

Waxa curiyay Abwaan Faysal Cali (Gooni)

Udug waxa ay gashay xaalad boholyow ah, xiisihii Dhulkeeda iyo Ciiltire aragtidiisii ayaa iskugu darsamay. Caawa hurdo kuma soo dhicin oo waxa ay sugi kari la'dahay inta uu waagu baryaayo; waayo berri 6:30 subaxnimo ayaa ay ku qoran tahay Diyaaradda. Wax ay kolba dhinac isku rogto, iyada oo ka fikiraysa sidii ay Ciiltire ugaga dhigi lahayd kadiso, in ay Dalka ku soo laabatay.

Maba oga in wiilkii shilka kula dhaawacmay ee sababta u noqday in ay ka baaqato waxabarashadii ay dibadda ugu baxaysay uu ahaa isaga!

Iyada oo aan laba indhood isku keenin ayaa uu waagii baryayay, gaadhigii gaynayay gegida diyaaradaha ayaana soo wacay. waxa ay u soo jihaysatay garoonkii Diyaaradaha oo ay ugu danbayn ka soo duushay. Ma dareemayso in aanay xalay seexan, farxadda qalbigeeda ka burqanaysa darteed iyo xusuusaha ku hirdamaya maskaxdeeda; ayna sugi kari la'dahay in ay ku dhaydo aragtida Dhulkeedii, Ehelkeedii Iyo Ciiltireba.

Waa Ciiltire oo iskaga jira hawlihiisii shaqo, walaw qalbigu holcayo oo ay kolba ku laba kaclaynayaan xusuusihii Udug soo kala dhex maray iyo xanuunkii ay wada dhadhamiyeen, haddana waxa uu nafta ku samirsiinayaa, in aanu uba qalmin guur ee uu iska ilaawo haween iyo hiisigoodaba; maaddaama lagu sheegay madhalaysnimo dhaawicii uu ka dhaxlay!
Waqtiyada uu caaddifaddiisa hayn kari waayo waxa uu wacaa number-keedii oo wali ugu jira kaydka, isaga oo og in uu xidhan yahay; balse naftuu ku sabaa rejo quus ku idlaata iyo iscanaanad nafeed!.

Waa goor galab ah oo Salaadii casar uun markaas laga baxay, waxa dhacaya tilifoon gacmeedka Ciiltire oo dul yaalla sariirtiisa, isaga oo waqtigaas ka soo laabatay masaajidka; una diyaar garoobaya in uu baxo si uu waqti ula soo qaato qaar ka mid ah Asxaabtiisa. Waxa uu u soo dhaqaaqay dhankii uu ka dhacay tilifoon gacmeedkiisu, Naxdin iyo farxad ayaa iskugu darsantay, mar kaliya ayaa uu inta uu qabtay kor ugu dhawaaqay " Mataantii jacaylkaay, maxaad mudatay dabaday; ma nooshahay ma dhimashaa xageed maanta joogtaa?"
Inta ay qosol la dhacday, ayaa ay ku jawaabtay
" Waar Ciiltire walaal waan kuu fiicanahay, wax badan ayaana inoo kala danbeeyey oo mabaan tagin jaamacadii, waanigii dhiman gaadhay ee maanad maqal in aan shil galay oo ishaadiibaa igu dhacday" deedna qosol ayaa ay cabbaar dhag ka siisay.

" Walaal ma wallaahibaa oo waad joogtaa ma rumaysan karee!" Ayaa uu haddana ku celiyay
" Haa ee immika suuqaan joogaaye iskugu keen keen hotel-kii aynu barigii ku kulannay barigii iskugu keen danbaysay."

" Haye walaal wanigaas soo baxayaba."ayaa uu degdeg ugu jawaabay.

Farxad ayaa uu boodbooday ilmana ka qubatay. Deg deg inta uu u labbistay ayaa uu gaadhigii ku booday.

Waxa aad mooddaa caruus, farxadda ka dhacaysa iyo nuurka wajigiisa ka baxaya. Iyada laftigeedu farxad daraadeed waxa ay kaga sii horraysay hotel-kii ay ku ballameen iyada oo sidda hadiyado, sidoo kalena rabta inay ugu bushaarayso in aanay noqonayn, walaw ay ka baqayso in uu guursaday gabadhii Axlaam ee uu u sheegay waqtigii iskugu danbaysay.

Gaadhi ka duwan gaadhigii hore ayaa uu ka soo degay, waxa aanu u soo jihaystay halkii ay fadhiday Udugsan oo ahayd Isla kuraastii markii ay iskugu dambaysay ku fadhiyeen!
Salaan ka dib waxa ay ku bilowday iyada oo qosolaysa "Oo gaadhigii waatan la baddalaye talaw gabadhiinna ma la guursaday?"
Inta uu wadnuhu "dhug" yidhi Ciiltire oo ku ka yaabay sida ay u moogan tahay ugana war la'dahay jabkii dhacay ayaa uu ku yidhi " Oo maanad ogayn in aan shil galay oo gaadhigiina iga burburay?"
Isaga oo hadalkiisa sii wata ayaa uu haddana yidhi " Shilkii kugu dhacay anna wuu igu dhacay oo aniga ayaa uu ahaaba qofkii gaadhiga aad la socotay jiidhsiiyay gaadhigiisu, laakiin nasiib xumo ismaynaan ogaan oo wax walba daaha dabadiisa ayay ka dhaceen kadisana way noqotay. Aniga laftigaygu maan ogayn ee wiil aan saaxiib nahay ayaa ii sheegay oo isku keen yaqaanay, la yaab ayaanay igu noqotay. Balse Illaahay ayaa aan ugu mahadnaqay in aynaan dhiman oo aynu wada nool nahay wali; xanuunkii ina soo wada gaadhayna aynu ka caafimaad qabno, walaw uu aniga dhaawacii jidhkayga soo gaadhay mugdi galiyay noloshaydii iyo mustaqbalkaygii guur. Waa laga yaaba in aad ka fikirayso in aan guursaday, balse gabadhii Axlaam waa ay iga tagtay, markii ay ogaatay waxa i haleelay. Waad yabaan tahay oo wadnaha garaaciisaan maqlayaa waxa aanad is waydiinaysaa " talaw waa maxay waxaasi?" Balse waxa aad ogaataa hiilka aan haystaa in uu adiga yahay oo aad ii hiilin doontid ama aad iska danaysan doontid; xaqna waad u leedahay labadaba.

Udugsan waxa uu dhakhtarku ii sheegay in dhaawicii i soo gaadhay aan ka dhaxlayo madhalaysnimo oo aanan waxba dhali doonin laakiin anigu wali rejo ayaa aan ka qabaa in uu Alle igu arsaaqo ubad awooddiisana uu ku suurto galin doono. Waan ku xiisay inta uu qof qof kale u xiiso qalbigayguna wuu ku tabay; waxa aanan gadaal ka ogaaday in aad ahayd mataantaydii dhibtana in aynaan ku kala tegin ayaan anna rajaynayaa." Intaas ayaa uu hadalkiisii ku joojiyay Ciiltire isaga oo ilamada ka burqatay wajigiisu ay qoysay laabatooyinka gacmihiisa. Iyada laftigeeduna qof aad u qalbi jilicsan xiise iyo Jacaylna isku biirsaday ayaa ay ahayde way ku dartay " Haye" wax aan ahayna afkeeda kamay soo baxayn. Waxa argagax iyo kediso ku noqotay dhacdooyinkaas uu u sheegay ee aanay ogayn, afkala qaad iyo fajicisana ku reebtay.

Mid walba dhankiisa iska masax ilmadii, iskuna day in uu is dajiyo.
Hadalkii waxa qaadatay Udugsan oo tidhi " Walaal Ciiltiroow wax aan kuugu jawaabo garan maayo, balse waxa aan xaqiiqsaday in aynu nahay Mataanihii Jacaylka, sidii aynu u qaybsannay xannuunka shilka iyo dhaawacyadii ina soo maray, ayaa aan diyaar kuula ahay inaan nolosha kula qaybsado dhib iyo dheefba. Waxa kale oo aan kuu sheegayaa in aan guur diyaar u ahay, qorshaha aqal dhiskeenana aynu guda galno oo aynu hawshaasna sideeda uga soo baxno. Meelna ku kala tagi mayno illaa wad ina kala qaado mooyee.

Aakhirana Jannada inaynu wadajir u galnaan Alle ka baryayaa. Niyadda deji oo khayr ugu bushaaree Ciiltiroow. Ayaa ay hadalkeedii ku soo afmeertay Udugsan.

waxoogaa markii la is xaal waraystay waxa ay Udugsan ka soo saartay gaadhigeedii hadiyado aad cajiib u ah oo dhar iyo saacado iyo cadarro iskugu jira, kaas oo ay ka soo iibisay Hindiya.
Aad ayaa uu jawiga Ciiltire isku beddelay, farxad daraadeedna wuu la ilmeeyey una mahad celiyay Udugsan, waayo waxa ay siisay rejo uu dhigay muddo hore oo waxa gubayay ayaa aha in uu helo lammaane ku oggol xannuunka lagu sheegay. Muddo 40 mirir ah oo ay casho iyo sharaab cabbeen, waxa ay ku ballameen in ay guur u diyaar garoobaan 2 bilood ka dib.
Mid walba gaadhigiisii ayaa uu ku dhacay oo guryahoodii ayaa ay u carraabeen iyada oo mid walba uu dareemayo farxad halkii ugu sarraysay iyo degganaan.
Isla markii uu gurigii tagay Ciiltire, waxa uu wacay Udugsan waydiiyayna in ay gurigii nabad tagtay, in ay nabad tagtayna u sheegtay. Markii uu ka dhigay tilifoon gacmeedka Udugsan, waxa uu toos ugu tagay Hooyadii oo qolkii Hurdada ku jirta isaga oo aad u qoslaya.
"Hooyo baryahaas kumaan arag adiga oo sidan u qoslayee maxaad la kulantay." Ayaa ay ku tidhi Hooyadii iyada oo la yaabtay muddadan kooban ee uu farxaddiisii uu waayay ku helay ee ay ugu soo laabatay.

" Hooyo macaan, gabadhii shilka aanu wada galnay ma xasuusataa?"
"Haa hooyo wiilkaygiiyoow" ayaa ay ugu war celisay.

" Gabadhii shaw waxa ay ahayd inan aanu wada sheekaysannay muddo gaaban aadna ii jeclaatay anna aan u jeclaaday, walaw aanan kaaga warramin..."
Dhacdooyinkii ayaanu si waafiya uga warramay uguna sheegay Hooyadii.

" Waaba mucsjiso hooyo qisadiinu mataano nafta ku midoobay ayaanad tihiin ee gabadha goormaynu hawsheeda galnaa?" Ayaa ay hadalkeedii ku soo xidhay iyada oo aad u dhoolla caddaynaysa, farxadda wiilkeedana ku mabsuudsan.
Waxa aanu u sheegay in 2 bilood ka dib guur ku ballameen oo ay labadooduba is diyaarinayaan. Farxad iyo raynrayn ayaa ay habeenkaas u ahayd Ciiltire iyo Hooyadiiba. Hurdo fiican ladday Udugsan laftigeeduna waxaana ka kala degay culaysyadii maskaxeed ee haystay.

Waagii ayaa baryay, Ciiltirena waxa uu u kallahay shaqadiisii, intii uu ku sii socdayna waxa uu la hadlayay Udugsan.
Xafiiskii markii uu gaadhay ayaa uu macasalaameeyey Udugsan, horena u galay kursigiisiina salka dhigay. Maamulihii shirkadda oo ordaya ayaa u soo galay, Ciiltirena u sheegay in uu shaqada ka joojiyay, maanta laga bilaabana aanu dib u soo gelin xafiiskiisa, lacagtiisii bishana miiska ayaa uu ugu soo dul tuuray iyo warqaddii casilaadiisa. Amakaag

iyo ciilbaa iskugu darsamay Ciiltire, maamulkii ayaanu ku yidhi " waa maxay sababta aad igu eryayso aniga oo aan waxba samayn" waxa aanu ku yidhi "Ciiltiroow ma shaqaysanaysid oo habsan Iyo cagajiid ayaad baryahan isku darsatay ee caawa haynoo ahaato, markaasaan kuu wada caddayn waxa aan kugu haystee, immikana xafiiska ii dhaaf oo iiga bax."
Cadho jiq isaga oo ah ayaa uu albaabkii soo dhaafay, gaadhigiisiina ku soo dhacay, waxa aanu wacay Udugsan isaga oo uu u sheegay in shaqadii laga eryay!.
" Ciiltiroow shaydaanka Iska naar oo is deji, shaqo ka khayr badan ayaad heli doontaa, Insha Allah." Ayaa ay ugu laab qaboojisay Udugsan.
Inta uu "waayahay" yidhi ayaa uu Iska dhigay.

Waxa ay gaadhay habeenimadii Ciiltirena waxa uu sugayaa in uu soo waco ninkii shaqada ka soo eryay oo uu u sheego waxa uu kaga eryay shaqadiisa.
8:00 habeenimo markii ay ahayd ayaa uu soo wacay ninkii uu sugayay, una sheegay in uu shaqada uga eryay maaddaama uu xidhiidh la leeyahay gabadha uu rabo in uu guursado isagu ee uu damacu kaga jiro. Haddii uu rabo in uu shaqadiisa ku soo noqdana ay tahay in uu ka tanaasulo xidhiidhka uu gabadhaas la leeyahay, haddii kalena aanu dib cagaha u soo dhigayn xafiiska. Ciiltirena waxa uu isaga oo qoslaya ayaa uu ku yidhi " Waar taas waan u soo dhintee ha ku habsaamin, indhahaaga oo shan ahna waan guursanayaaye. Shaqadan aad ku naxsan tahayna berriba mid ka wacan waaan heli oo arsaaqda Alle balaadhane cirka jeex soo dumi..." intaas markii uu yidhi ayaa uu ku dhigay wacayna Udugsan; si uu u waydiiyo in ay ninkan garanayso. iyana waxa ay u sheegtay in uu hore uga codsaday guur balse ay u sheegtay inay xidhiidh leedahay, habeenkii iskugu danbaysay ee ay is arkaana uu ku arkay hotel-kii ay ku kulmeen, habeenimadiina uu soo wacay, una sheegtay in ay Ciiltire wada socdaan walibana guur ku ballameen.
Inta uu qoslay ayaa uu yidhi " Oo shaw sababta lay eryayba waxa ay ahayd in uu arooskeena kala kiciyo oo uu camal la'aan i bido."
Waxaanay ku ballameen in ay xidhiidhkooda sii xejistaan kana feejignaadaan cadaw kasta oo jacaylkooda liddi ku ah.

Hooyadii ayaa uu arrinkii la wadaagay, waxa ayna markiiba u sheegtay in ay dabbarayso kharashaadka arooskiisa; sidoo kalena ganacsi u furaayso si uu uga maarmo gacan uu wax ka sugaba.
Maalmo ka dib waxa loo soo helay goobtii uu ganacsiga ka furan lahaa, waxa aanu furtay

goob kiraysa gawaadhida Iyo guryaha ,muddo yar ka dibna waa uu u balaadhay oo dakhli aad u badan ayaa uu u soo saaray ganacsigiisii. Bishii 1aad ee 2019 ayaa uu meherkoodu ka dhacay Magaalada Hargaysa oo ay wada degganaayeen, maalmo ka dibna way aqal galeen.
Jacaylkoodiina carqalado badan ka dib guul ayaa uu ku dhammaaday.
Waxa mucjiso noqotay in ay uur u leedahay Udugsan ninkeeda Ciiltire oo uu Alle u dhabeeyey niyad waanaagay ku midoobeen kuna arsaaqay wax aan la is lahayn way dhacaysaa.

Guul Iyo wanaag ayaa aynu u rajaynaynaa qoyskaas in ay ku dhammaystaan nolosha.
Waxa aynu ka baranaynaa in wadajirka Iyo daacadnimadu ka adag tahay caqabad kasta oo nolosha ah. Sidoo kalena in Alle (S.W) la talo saartaana ay tahay guusha nolosha.
Mar aan si gaar u waydiiyey qofkii sheekadan ii soo gudbiyey oo ka mid ah ehelka Ciiltire; sirta ka danbaysay in uu beenoobo wixii uu dhakhtarku u sheegay Ciiltire, waxa uu igu yidhi " wixii ugu horreeyey ee ay wadajir u samayn jireen ayaa ahaa duco joogta ah iyo sadaqo. Meherkoodii iyo Arooskoodiina waxa ay u qabsadeen si fudud oo wax is raaf ah may samayn."

F.G: magacyadan (Ciiltire Iyo Udugsan) waxa aan u isticmaalay si aan u ilaaliyo xogtooda shaqsiga ah.

Haddii aad xiganayso sheekadan fadlan ha qaadanin haddii aanad ilaalinayn xuquuqda.

Wixii talo ah kala xidhiidh qoraaga: **00252634410163**

Ama ciwaankiisa facebook-ga: Xamse Tudhaale